Statistiska centralbyrån
Statistics Sweden

# Nalaga qaybgal ee nala soo bandhig saldhigga aqoontayda iyo karti-xirfadeedkayga

*Waxaa goor dhow qadka taleefanka kula soo xiriiri doono hawlwadene ka socdo Statistiska Centralbyrån [Hay'adda tirokoobka]. Hawlwadenehu wuxuu ku qaban doona ballan ku salaysan saacad iyo goob waraysi kula yeesho. Markii Hawlwadenehu aad kulantaan wuxuu ku waydiin doona su'aallo ku saabsan taariikh-noololeedkaaga, waxbarashadaada iyo hawlaha aad qabato. Teeda kale, waxaad qaban doonta dhowr hawllo ku salaysan nool-maalmeedka, sida akhris, tiris iyo adeegsashada warbixin. Waraysigan wuxuu ka tirsan yahay cilmi-baaris ku salaysan heerka aqoonta iyo karti-xirfadeedka ee dadka waawayn, kaasoo ka dhici doono dalal tiradooda gaarayso 25.*

## Waa hawl dowladda na xilsaartay in aan fulinno

*Statistiska Centralbyrån* [Hay'adda tirokoobka] ayaa la xilsaaray in dalka Iswiidan ay baaritaanka ka fuliso. Waa hay'ad-dowladeed xilsaaran in iyadoo adeegsanayso tiro iyo tirokoob ay soo bandhigto muqaalka dalka Iswiidan. Haseyeeshe, dowladda Iswiidan ayaa xilsaartay in ay baaritaanka fuliso.

## Jawaabtaada waa muhim

Haddii aad shaqayso, shaqo-doone tahay, arday ama hawl kale qabato ayay haddana muhim tahay ka qaybgelidaada. Jawaabta ardayda, hawlgabyada, shaqaalaha iyo shaqodooneyaasha ba waxay noo suurtagelin doonta helida masawirka saxa ah ee bulshada maanta jirta. Jawaabta waa laysku dabaridi doona, waxayna noqon doonta tirokoob, kaaso tilmaami doono habka loo adeegsado aqoonta noolol-maalmeedka iyo suuqa shaqada ee dadwaynaha . Tirokoobka waxaa tusaale ahaan la adeegsan doona goorta gole baarlamaan ama dowlad go'aan ka gaarayso arrin xiriir la leh waxbarashada ama suuqa shaqada. Tirokoobka waxaa kaloo loo adeegsan doona goorta heer caalami ah lays barbardhigaayo dalalka cilmi-baarista ka soo qaybgalay.

## Qof kale laguma beddeli karo.

Adiga waxaad ka tirsan tahay dadyoowga dalka Iswiidan ku nool ee la soo xushay, kuwaasoo tiradooda gaarayso 10 000 qof. Hab baqtiyaanasiib ku salaysan ayaa adiga lagu xushay. Waxaad wakiil u tahay dadyoow aad isku taariikh-noololeed tihiin, sidaas awgeed qof kale laguma beddeli karo.

## Jawaabtaada way qarsoon tahay

Haddii aanu nahay hawlwadeneyada cilmi-baarista ee SCB , waxaan tixgelinaa sirta xirfada, sidaas awgeed jawaabtaada way qarsoon tahay. Qof ama hay'ad an shaqo ku lahayn ma heli karo/karto warbixin ku saabsan sida adiga aad su'aalaha ugu jawaabtay.

Maadaama jawaabtaada ay muhim tahay waxaan rajeynayna inaad nalaga qayb gasho waraysigan!

| | |
|---|---|
| Carina Lindén | Ann-Charlott Larsson |
| Ku-xigeenka agaasimaha | Madaxa baareha |
| Wasaaradda waxbarashada | *Statistiska centralbyrån* |

## Warbixin dheeraad waraysiga ku saabsan
Waraysiga wuxuu socon doona hal illaa laba saacadood. Caadi ahaan qofka ku waraysan doono wuxuu kugu soo booqan doona aqalkaaga, laakinse haddii aad doonayso waxaad ku kulmi kartaan goob kale, sida rugta buugagga. Waraysteyaasha dhammaantood waxay kaar lagu aqoonsado ka sitaan *Statistiska Centralbyrån*.
Su'aallaha ugu horreeyo ee lagu waydiin doono ayaa waxaa kamid ah kuwo xiriir la leh waxbarashadaada iyo khibradda shaqada. Markaas kadib waxaa laga codsan doona inaad kombyuutar ama warqad hawl ku qabato. Hawlaha waxaa kamid ah inaad akhriso amar, qeexdo jadwal ama adeegsato qariidad.

## Ma waajib baa in aan su'aalaha oo idil ka jawaabo!
Maya, xaq baad u leedahay in aadan su'aalaha qaarkood ka jawaabin.

## Warbixin aniga igu saabsan ma doonan doontaan?
Waxaa dhici karto in dhamaystirid awgeed aan diiwannada kala duwan ee *Statistiska Centralbyrån* warbixin ka soo xigsanno. Waa warbixin ku saabsan waxbarashada, xirfadda, shaqo, dhaqaale, caymiska bulshada iyo warbixin xiriir la leh diiwanka ummadda.

## Oggolaanshada in warbixinta la adeegsan karo
Oggolaanshada ka qaybgelida baaritaankan waxaad ku muujin kartaa, haddii aad waraysiga oggolaato.  Teeda kale, waxaad sidaasi ku muujin kartaa in aad raali ka tahay in warbixinta aan aqoonsiga lahayn – aan la ogayn qofka bixiyay, loo gudbiyo hay'adda *OECD* iyo hay'adda tirokoobka Denmark, oo ah goobta warbixinada Isbahaysiga dalalka Waqooyiga Yurub laysugu arruuriyo.

## Yaa baaritaanka mas'uu ka ah
Hawlgalka waxaa fulin doono *Statistiska Centralbyrån,* waa xil dowladda dalka Iswiidan ay hay'adda saartay in ay ku dhaqaaqdo. Waraysigan wuxuu ka tirsan yahay cilmi-baaris caalami ah ku salaysan heerka aqoonta iyo karti-xirfadeedka ee dadka waawayn, waxaan na hogaamin doono hay'adda *OECD*.

## Waa maxay sababta aan ugu qaybgelaayo?
Ka qaybgelidaada waxay naga caawini doonta tilaamida, sida adiga iyo kuwa kugu da'da ah u adeegsataan aqoontiina iyo karti-xirfadeedkiina.  Adiga waxaad ka tirsan tahay dadyoowga dalka Iswiidan ku nool ee la soo xushay, kuwaasoo da'dooda u dhaxeeyso 16-64 sano. Hab baqtiyaanasiib ku salaysan ayaa adiga lagu xushay. Waxaad wakiil u tahay dadyoow aad isku taariikh-noololeed tihiin, sidaas awgeed qof kale laguguma beddeli karo.

## Maxaa dhici doono haddii ka qaybgelida aan diido?
Ka qaygelida waa ikhtiyaari. Haseyeeshe, muqaalka sax ah ee aqoonta iyo karti-xirfadeedka dadka waawayn, waxaa la heli karaa haddii tirada ka qaygaleyaasha ay sarayso. Helida natiijo cadaalad ku salaysan waa muhim, maxaayeelay waxaa adeegsan doono barlamaanno iyo dowlado markii mustaqbilka ay go'aan ka gaarayaan.

## Natiijada yaa adeegsan doono?
Waxaa adeegsan doono baarlamaan iyo dowladda, xisbiyada, wargeysyada, telefiishanka iyo raadiyoowga, shirkadaha, ururrada shaqaalaha, cilmibaaryeyaal iyo ardayo, bulshada – kuwaasoo idil waa kuwa tirakoobka adeegsan doono.

**Sidee natiijada loo adeegsan doona!**
Warbixinta la soo urruriyay waa la baari doona, laysku dabaridi doona kadib jadwal ahaan iwm oo xarfo wehliyaan loo soo bandhigi doona. Taasoo marna suurtagelin doonin shaacbixinta sida qof gaar ah u su'aalaha ugu soo jawaabay.
Maadaama isla su'aalaha dalal tiro badan laga adeegsan doono, ayaa natiijada loo adeegsan doona is-barbardhigidda heerka aqoonta iyo karti-xirfadeedka ee dalalkaasi.

**Aniga ma lihi jinsiyada dalka Iswiidan – inkastoo sidaasi tahay ma doonaysaan in aan ka qaybgalo?**
Haa, waa tirokoob muqaal ummadda idil u noqon doono – iyadoo fiirogaar ah aanan la siin jinsiyada qofka.

**Ma hubaal baa in jawaabtayda la qarin doono?**
Warbixinta waxaa loola dhaqmi doona hab waafaqsan *PUL* (1998:2024) Xeerka xajinta warbixin-shaqsiyeedka. Hay'adda SCB ayaa sida loola dhaqmo mas'uul ka ah. Adiga waxaad sannadkii hal jeer lacag la'aan xaq ku leedahay in lagu siiyo warbixin adiga kugu saabsan iyo sida hay'adda ula dhaqanto.
Jawaabta waraysiga iyo warbixinada aan ka soo xigsanno diiwanka *SCB*, waxay hoos yimaadaan  nidaamka ku qeexan Xeerka bulsho u soo bandhigidda iyo sirta xajinta xirfada (2009:400). Xajinta sirta tirokoobka cutubkiisa 24:aad qodokiisa 8 § waxaa ku xusan in shaqaalaha hay'adda *SCB* u shaqeeya oo baaritaankan ku hawlan, ay tixgeliyaan xajinta sirta xirfada.
Natiijada baaritaanka waxaa kaloo loo adeegsan doona tirokoob kale, cilmi-baaris iyo dhaqdhaqaaq baaritaanno kale. Natiijada waa la keydsan doona illaa laga soo gabagabeeyo ujeedada baaritaankan.

Mahadcelin awgeed, waxaan ku siin doona kaar qiimahiisa ah 100 karoon, kaasoo dukamada badidooda wax uga iibsan karto.

**Su'aalaha guud**
**Ann-Charlott Larsson**
**019-17 63 14**
**lotta.larsson@scb.se**

**Su'aallo waraysiga ku saabsan**
**Monica Ekelund**
**019-17 63 81**
**monica.ekelund@scb.se**

**Lisa Öst 019-17 68 71**
**lisa.ost@scb.se**